

**X.M.J. 10 Noofember 1961, lamba. 294.**

**Ansixinta Xeer/nidaamiyaha lagu fulinayo xeerarka xagga bixinta hawlfududeynta dekadeed oo loo fidinayo rakibaadda qalabka kowaad ee looga shaqeeyo xagga wershadaha iyo beeraha iyo barista macaadinta, iyo weliba lagu taageerayo Hayadaha qaabilsan horumarinta bulsho, ee soomaaliya, oo lagu ansixiyey sharciga 10<sup>ka</sup> Noofember 1961, lamba. 26.**

#### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qodobka 83aad, ee Dastuurka;

Markuu arkay sharciga 10 Noofember 1961, lr.26, eela xiriira bixinta hawlfududeynta dekadeed oo loo fidinayo rakibaadda qalabka kowaad ee looga shaqeeyo xagga wershadaha iyo beeraha iyo barista macaadinta, iyo weliba lagu taageerayo Hayadaha qaabilsan horumarinta bulsho, ee soomaaliya;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Kaddib soojeedinta Wasiirka Lacagta;

#### **WUXUU XEERAYAA**

#### **QODOB KALIYAALE**

Waxaa la ansixiyey Xeer-nidaamiyaha ku lifaaqan sharciga ku saabsan (khuseeya) bixinta hawlfududeynta dekadeed oo loo fidinayo rakibaadda qalabka kowaad ee looga shaqeeyo xagga wershadaha iyo beeraha iyo barista macaadinta, iyo weliba lagu taageerayo Hayadaha qaabilsan horumarinta bulsho, ee soomaaliya, oo lagu ansixiyey sharciga 10<sup>ka</sup> Noofember 1961, lamba. 26.

Muqdisho, 10<sup>ka</sup> Noofember 1961.

**Aden Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wasiirka Maaliyadda

**Cabdulqaadir Maxamed Aden**

Waa arkay waana diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 9, xaashi lamba. 173

Muqdisho, 4<sup>ta</sup> Disember 1961.

Ku-xigeenka Hatidhowraha: **Cali Axmed Cumar**